Cabdiraxmaan C. Faarax 'Guri Barwaaqo'

# LAAXINJIRE IYO ASOORE

HAYAAN INSTITUTE

# LAAXINJIRE IYO ASOORE

Machadka Hayaan

# QORMAYAASHA LAAXINJIRE & ASOORE

Cabdiraxmaan C. Faarax 'Guri Barwaaqo'

© 2023 Dawga qoraalka

waxa iska leh  Cabdiraxmaan C. Faarax
'Guri Barwaaqo'

Dawga qoraalku idilkii wuu dhawran yahay,
sidaasi awgeed, buuggan guud ahaan iyo
qayb ahaan toona looma  dheegan karo,
lamana xaddilan  karo iyada oo aan
oggolaansho qoraal ah
laga haysan cidda
dawga
iska leh.

**Hal-aqoon Publishers**
Hargeysa, S/Layn.

Tel: 252 063-479-2393
E-mail: hal_aqoon@yahoo.com

Weydiimaha iyo falcelinaha waxa lagu soo
hagaajinayaa  haybgurida iyo iimeyka kor ku
xusan.

Copyright © 2023 by A.A.Farah 'Guri Barwaaqo'

All rights reserved

No part of
this book may be
reproduced in any form
or by any means, eletronic or
mechanical, including photocopying,
recording, or by any information
storage and retrieval system,
without written
permission
from the
Copyright owner.

All questions and comments should
be directed to :

Qoraaga
Buulo-barwaaqo, Kood-buur
Hargeysa
Tel: 252 063-479-2393
E-mail: hal_aqoon@yahoo.com

# Maamuus

Buuggan waxaannu ku
maamuusay aabbahay iyo hooyada
oo runtii igu  ababiyey aqoon iyo kas
aan  u aayey, la'aantoodna  aanan
higsigeyga gaadheen.

# Tusmada buugga


I. MAHADNAQ....................................................................................9

II. HORDHAC.....................................................................................10

Ereybixin ......................................................................................11

III. ARAGTIDA LAAXINJIRE iyo SIDII AY KU DHALATAY...14

Waa maxay haddaba LaaxinJire ? ...............................................18

d. Shuruudaha looga baahan yahay adeegsadaha.........................20

1. Waa inaanu adeegsaduhu yaqaan badda ay tahay

maansada uu shirrabayaa ama bilkeedinayaa. ...............................20

e. Sida loo adeegsanayo LaaxinJire ................................................20

g. Hawlaha LaaxinJire iyo Wuxuu Soo Hooyey...........................28

Jaadadka gefefka uu LaaxinJire qabanayo ....................................32

IV. QORMAHA ASOORE ....................................................................45

Tuse /Index .........................................................................................49

# I. MAHADNAQ

Mahad Eebbaa
iska leh. Cid uga mudan in loo
mahadnaqana ma ogi. Intaa kaddib
waxan si gaar ah iyo si guudba ugu
mahadcelinayaa dhammaan dadkii
talooyinka iyo dhiirrigelinta wax-ku-
oolka ah ii la heellanaa intii aan
hawshan ku foognaa.

*Cabdiraxmaan C. Faarax*
*'Guri Barwaaqo'*

## II. HORDHAC

2007dii buu Raacii 1aad (*1st version*) ee qormaha LaaxinJire dammaystirmay. Waxaanan kaga qayb galay, oo aan ku soo bandhigay, shirweynihii 10aad ee Cilmibaadhista Soomaali-yeed, laguna qabtay Jaamacadda ku taal magaalada Kolombas (Colombus) ee gobolka Ohio ee dalka Maraykanka. Haddaba buug yarahan kooban waxaan idin kula wadaagi sidii ay aragtidii qormahaasi ku dhalatay, xilligii uu horreyey ee aannu dadweynaha u soo bandhignay, degelkii lagu soo bandhigay iyo awooddii uu lahaa.

Lix-iyo-toban gu' kaddib, kuna beegnayd sannad guuradii 47aad ee ka soo wareegtay kolkii uu (AHUN) Maxamed Xaashi Dhamac 'Gaarriye' ku guuleystey inuu soo bandhigo aragtidiisii Miisaanka Maansada, bay noo suurtagashay inaanu idinla wadaagno Raacii 2aad *(2nd Version)* ee LaaxiJire oo runtii sidii hore ka qurux badan, kana awood badan. Waxaananu qoraalkan idinkula wagaagi sida loo adeeg-sanayo, sumadda degelkiisa iyo awoodda ku soo korodhay. Waxa kale oo aannu idinla wadaagi sida loo adeegsanayo qorme kale oo ku lammaan lana yidhaa Asoore iyo waxa uu isna soo kordhiyey.

## Ereybixin

Adeegyo – Serveces

Asoor – Analyze.

Asoore – Analyzer.

Deelqaaf – Alliteration error

Dhur – Result

Kalgal – Frequency

Kalgallo – Frequencies

Laaxin – Scansion error

Miisaan – Scansion

Nagu saabsan – About us

Nala soo xidhiidh – Contact us

Qaafiyad/xarafraac – Alliteration

Qoraal Asoore – Text analyzer

Tirsi – Number

Tuduc – Verse

Tuducyo w. – Verses

LAAXINJIRE

* *


Qormaha

# III. ARAGTIDA LAAXINJIRE iyo SIDII AY KU DHALATAY

Scansion checker

## Hordhac

Aroor Sabtiya ayey ahayd. Gu'gu wuxu ahaa 2000. Goobtu waxay ahayd magaalamadaxda dalka Kanada ee Ottawa. Waxa isoo wacay jalahay Xuseen-Mataan.[1] Bariido wacan kaddib wuxuu ii sheegay inuu, xilligaa, akhriyey buug ladhkiisu ahaa *'The Theory of Numbers'*, waxaanu ka hadlayaa buu yiddi in xisaab ahaan lagu ogaan karo tirada xarfaha af Ingiriiska ama kuwa af Faransiiska ee qoraal kasta ku jira. Markuu intaa sheegay baan anna idhi: haye? Maxaad ujeeddaa?




*The Theory of Numbers*

[1] Xuseen Yuusuf Liibaan

Isaga oo aan faahfaahin kale ii gelin buu yidhi: Af Soomaaliga ma la ogaan karaa, sida afafkaa, tirada higgaaddiisa qoraal kasta laga heli karo ama ku jirta?

## Weydiintii dhalisay aragtida LaaxinJire

Intaan yaabay baan ku idhi: Ma afafka dhawrka kun ee gu' jirey iyo keennan dhawaan dhaladka ah baad is barbar dhigaysaa? Midda kale sawdiga og aqoonta dadkeenna, maxaad isu yeelyeelaysaa? Intaanu weydiimaahaa ka warcelin baan u raaciyey oo ku idhi: Horaa loo yidhi ceelna uma qodna, colna uma maqna e, adigu ma qori kartaa qorme kaas oo kale ah?

Inta uu cabbaar iga aammusay buu iigu warceliyey oo yidhi: Waan isku deyi ee waa inoo iyo toddobaadka dambe.

Sabtidaa Sabtideedii baan gurigiisii ku booqday. Wuxuu ii soo bandhigay qorme kooban oo runtii qoraalladii aannu ku bilkeediney oo dhan sheegay mid kasta intii xaraf ee ku jirtey.

Kolkii aan arkay inuu Jalahay ku guuleystey aragtidii aan la yaabbanaa, baan ku idhi: Haddii aad kaa samaysay waxaad samayn kartaa ku kale. Intuu kor ii soo jalleecay buu I weydiiyey oo yidhi: Oo kaasu muxuu ahaa? Waxaan ugu warceliyey waa mid ku salaysan Miisaanka Maansada. Isaga oo yaabban buu iigu warceliyey: Haddii aan fahmo waa laga yaabaa. Warcelitaydii baa noqotay: Aniga ayaa ku fahamsiin. Waa yahay iyo waa hagaag baannu taladii ku guddoonsanney.  Laga bilaabo maalintii, dhawr gu' oo ka

dambeeyey maalin kasta oo sabtiya waannu kulmijirney. Waxaan ku guuleystey inaan fahamsiiyo aragtida Miisaan-ka Maansadu ku salaysan yahay. Isaguna ku guuleysey inuu sidii uu filayey u fahmo.

Qoraalka la yidhaa: *Miisaanku waa furaha kala asooridda badaha maansooyinka Soomaaliyeed*, oo aan kolkaa waday ayaa ka mid ahaa aragtiyaha uu Jalahay Liibaan ku qancay oo uu ku dareemay inay aragtidu ahayd mid maangal.
Kobtaasi ayey alkumidda aragtida qormaha LaaxinJire ka bilaabantay. Waxaannu isla maalintaa yaqiinsannay in miisaanka loo adeegsankaro ama uu yahayba agab lagu ogaan karo laaxinka[2] iyo deelqaafka[3], laguna kala ogaankaro jaadadka kala duwan ee badaha maansooyinka.

Waxa kale oo aannu is dareensiinney in inta la baranayo iyo inta laga niibgaadhayo miisanka, sida wax loogu saxaa, ay qaadanayso muddo aad u dheer. Dadka inta kartidaa iyo samirka intaa leeg lihina ay aad u yar yihiin. Waxa kaloonnu isdareensiinnay inay adagtahay ama ay xilli badan oo maalmo ku siman qaadanayso haddii lays yidhaa gacanta ha lagu saxo maanso dherekeedu yahay 100 tuduc, tu ka badanna ay ka sii adag tahay.

Sidaasi darteed, waxaan tallan ku jirin in dhibaatadii aan ka hadleyney ay sidii u jireyso. Waxa markaa lagama

[2] Gefka gala miisaanka weeyaan laaxinku
[3] Gefka gala xarafraaca ayaa la yidhaa deelqaad

maarmaan noqotay inaan isla eegno sidii loo helilahaa tab ku dhisaalan aragtidan oo si fudud loo adeegsan karo.

Hadal iyo dhammaantii, waxay talo isugu soo ururtay in aragtidan loo rogo qorme kumbuyuutar kaasi oo ay cid waliba adeegsankarto. Arrintaasi dad badan bay riyo ula ekoonaatay. Qof kasta oo aannu talo bidnayba intuu na eegay buu naga dhaqaaqay. Waxaannu riyadaa ku jirnaba aragtidayadi way dhabawdey.

## Waa maxay haddaba LaaxinJire ?

LaaxinJire waa qorme kumbuyuutar oo ku dhisaalan aragtida Miisaanka Maansada looguna talagalay inuu saxo ama kugu baraarujiyo laaxinka iyo deelqaafka gala badaha kala duwan ee maansada Soomaaliyeed.

### LaaxinJire (Raacii 1aad)

Qormihii u horreeyey ee LaaxinJire wuxuu soo baxay gu'gu kolkuu ahaa 2007dii. Waxa dadweynaha loo soo bandhigay 2012kii. Sumadda degelkiisuna waxay ahayd www.halgeri.com. Wuxuu awood u lahaa inuu adeegsadaha ku baraarujiyo laaxinka iyo deelqaafka ku jira toddoba (7) badood oo qudha. Waxa kale oo uu awood u lahaa inuu sheego tirada tuducyada ay maanso kastaa ka kooban tahay.

## LaaxinJire (Raaca 2aad)

Ujeeddada loo adeegsanayo Raacani waa sidii kii hore. Hayeeshee, wuu ka awood badan yahay kii hore. LaaxinJire 2 wuxuu awoodaa bilkeedinta ugu yaraan 40 badood oo ka mid ah badaha maansooyinka Soomaalida. Xawaaraha uu dhurta ku soo bandhigayo ayaa iyana xusiddeeda leh.

## c. Muxuu soo kordhiyey

- Qof kasta oo maanso curiyaa gefkiisa si hawl yar buu u ogaan karayaa, taasi oo waagii hore adkayd.
- Xawaaraha uu wax ku bilkeedinayo, sida aan soo sheegnay, ayaa wax loo dhigaa jirin. Inkasta oo ay ku xidhantahay jaadka kumbuyuutarka la adeeg-sanayo. Tusaale ahaan, maansada *Duufaan* ee uu curiyey Abwaan Xasan Xaaji Cabdillaahi 'Ganey' oo ka kooban 912 tuduc wuxu ku shirrabayaa ilbidhiqsiyo (in ka yar hal daqiiqo).
- Badaha maansooyinka oo si fudud loo kala garan-karayo.
- Qof kastaa wuu adeegankarayaa, hadduu yahay abwaan iyo haddaanu weligii laba erey isu geynin.

## d. Shuruudaha looga baahan yahay adeegsadaha

1. Waa inuu adeegsaduhu yaqaan badda ay tahay maansada uu shirrabayaa ama bilkeedinayaa.
2. Waa inuu hubaa in maansadu u kaydsan tahay qaabka loo yaqaan '**plain text** ' ama '**RTF**'.
3. Waa inuu yaqaan gosha '*the Directory*' ama galka '*the file*' ay maansadu ugu kaydsan tahay.
4. Koka uu badda xulanayo waa inuu hubiyaa inuu xushay baddii uu rabay.

## e. Sida loo adeegsanayo LaaxinJire


Kolka hore gal degelka https://hayaaninstitute.com/ laaxin.php. Marka uu kuu furmo waxaa ku hor iman sawirka *LaaxinJire.1.* oo ah bogga 1aad ee degelka **Machadka Hayaan** (*Hayaan Institute*) ee hawsha LaaxinJire fuliyey.




*LaaxinJire .1*

Haddaad eegto tiirka dhanka bidix ee midabka cusburka ah leh, ka xulo badhanka ay ku qoran tahay LaaxinJire/ScansionCheck */ ScansionCheck'* , waxaana kuu soo baxaya bogga 2aad ee degelka, kaas oo ah bogga ay hawsha *LaaxinJire* ka socoto.

Sida ka muuqata sawirkan hoose (*LaaxinJire .2*), riix badhanka ay ku dul qoran tahay Xulo bad Xulo bad





*LaaxinJire .2*

Kolkaad badhanka riixdo kaddib, waxa ku soo bixidoonta qalwada (*window*) sawirka *LaaxinJire.3* ka muuqata. Qalwada waxa ku taxan magacyada badaha ay tahay inaad ka xulato badda aad rabato inaad bilkeedisaa.





*LaaxinJire .3*

Si aad u xulato badda maansada aad rabto inaad shirrabto gammuunka (*the arrow*) maaxiyeenka (*the browser*), dulgee halka magac baddu ku qoran yahay kaddibna riix. Waxa kuu soo bixi qalwo yar oo kale oo aad ka sii xulandoonto gosha (*the directory*) uu ku jiro galka (*the folder*) ay maansada aad rabtay inaad shirrabtaa kuugu kaydsanayd. Tusaale ahaan, haddii aad xulado badhanka ay ku qoranyihiin; *Masafo/Jiifto/Batar* waxa kuu soo baxaysa qalwada sawirka soo socda ka muuqata.




*LaaxinJire .4*


Mar labaadka riix badhanka ay qoran tahay Xulo gal . Kolkaad riixdo waxaa ku hor iman golayaasha (*Directories*) ay ka midka yihiin: *Desktop, C:, D:, E:,* ama *USB* oo ah halka uu kugu jiro galka ay faylasha maansadu kuugu kayd sanyihiin. Waxaana kuu soo bixi qalwadan hoos ka muuqata.




*LaaxinJire .5*

Ugu dambayntii, xulo gosha, oo ka sii xulo galka ay maansadu ama maansooyinku kuugu jiraan sida ka muuqata sawirkan hoos.


Haddii aad haddaba, tusaale ahaan, xulato ama astayso maansada *Balaf* sida ka muuqata sawirkan *LaaxinJire .6.*




*LaaxinJire .6*

Waxa lagaaga baahan yahay inaad riixdo badhanka dhanka midig ku yaal ee uu ku dulqoran yahay ereyga '*Open*' oo la ujeeddo ah '*Fur*'. Kolka aad riixdo waxa qalwada hoosteeda ka muuqandoona magacii maansada 'Balaf' sida ka muuqata sawirka *LaaxinJire .7.*


Taasi waxay caddaynaysa inay maansadu diyaar u tahay in la shirrabo ama la bilkeediyo.




*LaaxinJire .7*

Halkaa kolka aad marayso riix badhanka ay ku dul qoran tahay farriinta ah '*Bilkeedi maansada*'. Kobta

bannaan een goobaabta cas aan ku sameeyey (*sawirka LaaxinJire.7*) waa halka ay dhurta maansadu ku soo baxayso ama ku soo bixidoonta kolka aad riixdo badhanka bilkeedi. Waxaana kuu soo bixi dhurtii aad sugeysey oo noqondoonta sidan hoos ku sawiran.





*LaaxinJire .8*

Qalwadii aynu markii hore wax ka dooraneyney, tu kale oo midabkeedu yahay buluug baa ka soo hoos baxday. Waa ta kuu sheegaysa dhurtii aad sugeysey oo faahfaahsan, sida:

- ✓ Magaca maansadu waa: *Balaf.*
- ✓ Baddeedu waa: *Jiifto.*
- ✓ Tirada tuducyadeedu waa *64 tuduc*.
- ✓ Midh laaxin ahi kuma jiro, deelqaafna warkiisa haba sheegin.

Sida qalwada dhexe ka muuqata waxa ku qoran tuducyadii maansada oo midab calan ah leh. Taasi oo tilmaan u ah inaan midh laaxin ah ama deelqaaf ihitoona ku jirin maansada. Haddii midabka tuducyadu noqdo casaan sida ku cad sawirkan hoos ku yaal waxay tilmaan u tahay inuu laaxin ku jiro maansada ama aanay maansadu ahaynba badda la shirrabayo.




*LaaxinJire .9*

Haddii midabka tuducu ama tuducyada qaar noqdaan doogo, sida sawirkan hoos ku cad, waxay iyana astaan u tahay ama tilmaamaysaa in maansada uu deelqaaf ku jiro.

Ugu dambayntii, qoraalkan waxaannu kaga hadalnay dhibaatooyinkii haystay maansada Soomaaliyeed intii aan

afka la qorin iyo sida kolkii afka la qoray wax badan oo waxtar leh loo soo kordhiyey sida Miisaankii Maansada.

Waxa kale oo aannu soo hadal qaadnay sida uu miisaanku u yahay agab loogu adeegsan karo kala asooridda badaha maansooyinka laysku murgiyo. Mar kale waxaannu tibaaxnay sida aragtiyahaasi loo casriyeyn karo oo loogu rogikaro qorme kumbuyuutar, kaasi oo ay cid kastaa si hawl yar u adeegsan karto. Si aan madmadow lahayn waxannu u guud marnay sida loo adeegsanayo iyo dhibaatooyinka uu wax ka qabanayo LaaxinJire . Hadal iyo dhammaantii waxan aragtidan ku tilmaamikarraa mid wax weyn ku soo kordhisay afka iyo suugaanta Soomaaliyeed, aqoonyahanno badanna xaradhaamindoonta si ay hawshan halkaasi uga sii ambaqaadaan.

# g. Hawlaha LaaxinJire iyo Wuxuu Soo Hooyey

## Hordhac

Bishii 9aad ee 2012kii wuxuu Machadka afafka Jabbuuti soo qabanqaabiyey shir ay ka soo qayb galeen aqoonyahanno ka kala socday Soomaalilaan, Soomaaliya iyo Jabbuuti, kaasi oo lagaga wada hadlayey sidii uu af Soomaaligu u noqon lahaa mid si loo wada qoro. Shirkaasi oo socday 4 maalmood waxa lagu gaadhay go'aanno aad loogu bogey oo ay dulucdoodu ahayd sidii uu af Soomaaligu u noqon lahaa mid si loo wada qoro. Runtii, aragtidaasi waxay ahayd isku day habboon oo loo qaaday xasilinta, gaar ahaan sugidda soohdimaha ereyada Soomaaliga. Si kastaba ha ahaatee, intii aannu wadnay hawsha LaaxinJire waxan la kulannay arrin naga yaabisay oo runtii keeneysa in qodobbadii heshiiyada mid ka mid ah dib loogu noqdo. Intaanan haddaba sheegin qodobkaasi kuu ahaa, malaha waxa habboon inaan dib u yar milicsanno hawlihii aannu shirka ku falanqayney iyo arrimihii laysla meel dhigay. Intaa kaddib waxaan wax ka odhan qormaha

LaaxinJire iyo hawl qabadkiisa, waxaanan ku soo af jari qodobka aan soo jeedineyno in dib loo eego iyo sidii aannu ku ogaannay.

## Shirkii iyo hawlihiisii

Shirka waxa lagaga wada hadlayey sidii af Soomaaliga loo xasilin lahaa. Haddii aan si kale u dhigo waxa laga wada hadlay sidii af Soomaaligu u noqon lahaa mid si loo wada qoro. Wuxu shirku soo diyaariyey ereyo farabadan oo ay qorayaashu siyaabo kala duwan u qoraan . Shaxanka 1aad ee hoos ka muuqdaa wuxu tilmaamaya in ereyada lamman loo kala qoro laba siyood (eeg tiirka 1aad iyo ka 2aad ee shaxanka). Kolkii arrimahaasi la falanqeeyey waxa laysla meel dhigay in isku si loo qoro. Sida lagu heshiiyeyna waa sida tiirka 3aad ee shaxanka 1aad ku xusan.

| Sida 1aad ee loo qoro | Sida2aad ee jirta | Sida laysku raacay |
|---|---|---|
| Is-dhiib<br>Soo-saar<br>Biyo-shub<br>Bare-yaal | Isdhiib<br>Soosaar<br>Biyashub<br>Bareyaal | **Isdhiib**<br>**Soosaar**<br>**Biyashub**<br>**Barayaal** |

| | | |
|---|---|---|
| Sir-doon | Sir doon | **Sirdoon** |
| Wadane-xanuun | Wadne xanuun | **Wadnaxanuun** |
| Magaalo madax | Magaalo-madax | **Magaalamada** |

**Shaxanka 1aad**

Arrimaha shirka lagu falanqeeyey go'aankana la gaadhay waxa kale oo ka mid ahaa ereyada magaca dheddig ah ee 'l'-da ku dhammaada. Tusaale ahaan, kolka ereyadaasi la raaciyo qodobka ayaa laba siyood loo kala qoraa sida ku cad tiirka 2aad ee shaxanka 2aad.

| Ereyga kolka qodobka la raaciyo | Labada siyood ee loo kala qoro | Sida laysku raacay in loo qoro |
|---|---|---|
| Ul (-ta) | Usha/Ulsha | **Usha** |
| Calool(-ta) | Caloosha/Caloolsha | **Caloosha** |
| Il (-ta) | Isha/Ilsha | **Isha** |
| Dhuxul (-ta) | Dhuxusha/Dhuxulsha | **Dhuxusha** |
| Bil (-ta) | Bisha/Bilsha | **Bisha** |
| Kal (-ta) | Kasha/Kalsha | **Kasha** |

**Shaxanka 2aad:**

Sida la wada ogsoonyahay ereyadaasu waxay qaataan qodobka '-ta'. Haddaba kolka ay 'l'-da iyo 't'-du is xigsadaan

bay 'sh'a isu rogaan. Haddaba dad qaar baa kolka ay qorayaan aan ka tegin 'l'-dii oo qora tusaale ahaan ereyga 'ul' kolka qodobka 'ta' la raaciyo waxay u qoraan 'ulsha'. Halka ay dadka qaarna u qoaan 'usha'. Kolkii haddaba loo adeegsaday aqoonafeedda waxa laysku qanciyey in la qaato sida tiirka 3aad ee shaxanka 2aad ku xusan.

Waxa kale oo lagu gorfeeyey shirka ereyada la yidha: waa isku dhigmo kala dhihid kala macne ee ku xusan tiirka 1aad ee shaxankan 3aad ee hoose.

| **Isku dhigmo kala dhihid kala mane** | **Kolka qodobbada lagu daro ayaa la kala gartaa** | **Si bilawgaba loo kala garto ,waxa laysku raacay in ereyga dheddig astaan loo yeelo** |
|---|---|---|
| Dameer/Dameer | Dameer(-ka)/Dameer(-ta) | Dameer/**Daméer** |
| Beer/Beer | Beer(-ka)/Beer(-ta) | Beer/**Béer** |
| Waxar/Waxar | Waxar(-ka)/Waxar(-ta) | Waxar/**Waxár** |
| Nirig/Nirig | Nirig(-ga)/Nirig(-ta) | Nirig/**Nirig** |
| Weyl/Weyl | Weyl(-ka)/Wey(-sha) | Weyl/**Wéyl** |
| Fariid/Fariid | Fariid(-ka)/Fariid(-da) | Fariid/**Fariíd** |
| Nacas/Nacas | Nacas(-ka)/Nacas(-ta) | Nacas/**Nacás** |
| Baqal/Baqal | Baqal(-ka)/Baqal (-sha) | Baqal/**Baqál** |

**Shaxanka 3aad**

Kolkii ereyadaa ayana la gorfeeyey waxa laysla gartay in dhibku ka jiro kolka la qorayo oo qudha. Waxana laysla

gartay in ereyada dheddig astaanta ku xusn tiirka 3aad ee shaxanka 3aad loo yeelo kolka la qoray.

Aragtiyaha shaxanka 2aad iyo ka 3aad, runtii , ilaa hadda wax dhibaato ah lagama soo sheegin. Hayeeshee, aragtida shaxanka 1aad waa ka uu hadalku ka daba yimid kolkii ay bilaabantay adeegsiga qormaha LaaxinJire. Inta aynaan haddaba ka hadal waxa soo kordhay bal aan kolka hore wax ka sheegno LaaxinJire iyo hawlihiisa.

## Jaadadka gefefka uu LaaxinJire qabanayo

Sida badi laga wada warqabo, kolka maanso la curinayo laba gef baa u weyn oo uu curiyuhu ka foojignaadaa si aanu u gelin. Labadaa gef waa *laaxin* ama waa *deelqaaf* (Barwaaqo, 2012). Tisaale ahaan

a. Duur-xuli **aan** maayee ( laaxin baa ku jira).
b. Duur-xuli **an** maayee ( laaxin kuma jiro).

a. Dawgoo **aan** seegnaan (laaxin baa ku jira).
b. Dawgoo an seegnaan (Laaxin kuma jiro).

a. **Stanzaw** nin doorkaa ( laaxin baa ku jira).
b. Istansaw nin doorkaa (laaxin kuma jiro).

a. Dulmigii lafaa dhuuxa**yb**aad dib u dhardhaarteene (laaxin baa ku jira).

b. Dulmigii lafaa dhuuxa**y b**aad dib u dhardhaarteene (laaxin kuma jiro).

Waxa haddaba is weydiin leh: Laaxin waa maxay? Deelqaafse muxuu yahay?

## Laaxin

Gefka gala miisaanka maansada ayaa la yidhaa laaxin. Tusaale ahaan bal u fiirso labadan tuduc ee soo socda ee odhanaya:

| | |
|---|---|
| 1 | Xalayto gelin dhexaadkii |
| 2 | Geyigaba dhammaantii |
| 3 | Maraan goobay keliyey |
| 4 | Ayaa geed agtayda ah |
| 5 | Intuu galaw ka oogsaday |
| 6 | Garabkay luloo yidhi |

a. Xalay gelin dhexaadkii
1 2 1 1 (1) 2 2 = 10

b. Xalayto gelin dhexaadkii
1 2 1 1 1 (1) 2 2 = 11

Tuduca hore ee 'a' waa meeris jeefto ah. Waana tobanley. Waxanad arkaysaa in xundhurtu (1) badhtanka ku jirto oo afar shaqal ka dambeeyaan, shan shaqalna ka horreeyaan. Halka ay tuduca dambe ee 'b' lix shaqal xundhurta ka horreeyaan afarna ka dambeeyaan. Taasi oo caddaynaysa in tuducaasi yahay mid uu laaxin ku jiro.

Markanna bal u fiirso labadan tuduc ee hoos ku qoran:

a. Dig dheh deelka maansada
1 1 2 (1) 2 1 1

b. Dig dheh deelka maansadii
1 1 2 (1) 2 1 2

Tuduca hore ee (a) waa jiifto. Waana sagaalley. Waxa curiyey Gaarriye. Laaxinna kuma jiro. Sidii aan soo sheegnay xundhurta (1) afar shaqal baa ka horreeya, afar kalana way ka dambeeyaan. Hayeeshee, tuduca labaad ee (b) waxad arkaysaa in shaqal dheeraad ihi u dhexeeyo afarta shaqal ee dambe. Sidaasi awgeed, miiskii tuducu wuu jaban yahay. Waxana la odhanayaa tuducaasi waxa ku jira laaxin.

## Deelqaaf

Deelqaafku waa gef ku yimaad xaraf raaca ama sida loo wada yaqaan qaafiyadda. Dulucda oo ah adiga oo xarafka 'd' ku socda oo aad keento tuduc isagu ku socda xaraf 'm'. Tusaale ahaa, aan isla eegno dhawrkan tuduc ee aan ka soo qaatay maansada *Dabataxan* ee uu tiriyey Marxuun Maxamed Xaashi Dhamac 'Gaarriye' ee odhanaya:

1. Markaan gabay **d**an uga baxo

2. Ama **d**aaqsho duunyada
3. **D**acar igu hulaaqdiyo
4. **Qalin saar ma waayee**
5. **Maantana Habdeeqow**
6. Wax i **d**ubuq yidhaa jira !
7. **D**uulka aan u naqayana
8. Dhedaa saaran lagu **d**edey

| Tirsi/No. | Tuducyo/Verses |
|---|---|
| 1 | Markaan gabay dan uga baxo |
| 2 | Ama daaqsho duunyada |
| 3 | Dacar igu hulaaqdiyo |
| 4 | Qalin saar ma waayee |
| 5 | Maantana Habdeeqow |
| 6 | Wax idubuq yidhaa jira! |
| 7 | Duulka aan u naqayana |

**(Midhihii M. Xaashi Dhamac 'Gaarriye')**

Bal u fiirso tuduc kasta, ka afraad mooyaane, waxa ku jira erey ku bilaabma xarafka 'd'-a oo aan ka dhigay mid diggoon. Taasi oo sheegeysa inay maansadu ku socoto xarafraaca 'd'-a. Hayeeshee, tuduca afraad isaga afarta erey ee ku jira midna kuma bilaamayo xarafka 'd' -a, miisaan ahaanse waa sax oo laaxin malaha. Sidaasi awgeed waxa maansada lagu timaamayaa inay tahay tu uu deelqaaf ku jiro (Barwaaqo, 2012).

## Arrinta cusub ee soo korodhay

Aragtida cusub ee soo baxday baa ah in ereyada lamman ee laysku raacay in laysku dhejiyaa ay muujiyeen, kolkii loo adeegsaday maansada, jiritaanka deelqaaf sida ku cad dhawrka tuduc ee hoos ku qoran:

| Tirsi/No. | Tuducyo/Verses |
|---|---|
| 1 | Garoo weerihii |
| 2 | Gambo muu hambayn |
| 3 | Gawracato iyo |
| 4 | Laxawgaal helaa * |
| 5 | Mahad buu gayaa. |
| 6 | Afartaa guntee |

**(Midhihii Xasan Xaaji Cabdillaahi 'Ganey')**

Tuduca 4aad ereyga 'laxawgaal' waa erey lamman oo ka kooban 'laxaw' iyo 'gaal'. Waana cudur geela ku dhaca. Kolkii haddaba maansada LaaxinJire lagu bilkeediyey waxa muuqatay inuu deelqaaf ku jiro. Waayo labadii erey baa laysku dhejiyey sidii lagu heshiiyey shirkii Jabbuuti. Hase ahaatee, haddii ereyga 'laxawgaal' la kala jaro oo loo qoro sidan '**Laxaw gaal'** deelqaafki wuu baxayaa sida hoos ku xusan:

| | |
|---|---|
| 1 | Garoo weerihii |
| 2 | Gambo muu hambayn |
| 3 | Gawracato iyo |
| 4 | Laxaw gaal helaa * |
| 5 | Mahad buu gayaa. |
| 6 | Afartaa guntee |

Sidoo kale haddii ereyga 'laxawgaal' loo kala dhexgeliyo xariir sida **'Laxaw-gaal'** iyana deelqaafki wuu baxayaa sida hoos ku xusan:

| | |
|---|---|
| 1 | Garoo weerihii |
| 2 | Gambo muu hambayn |
| 3 | Gawracato iyo |
| 4 | Laxaw-gaal helaa * |
| 5 | Mahad buu gayaa. |
| 6 | Afartaa guntee |

Waxa ka mid ah ereyada sida gefka ah la isugu dhejiyo *magac-u-yaal* iyo *fal* sida 'utali, utag, uhiili, iwm'. Tusaale ahaan bal u fiirso dhawrkan tuduc ee hoos ku qoan:

| | |
|---|---|
| 1 | Yaa seef la boodoo |
| 2 | Bayr lahaa colaadaha? |
| 3 | Nugul yaa ubaaqoo * |
| 4 | Boholaha xargagan tubay? |

Sidii kuwii hore haddii la kala durkiyo ama xariir loo kala dhexaysiiyo magac-u-yaalka 'u' iyo falka 'baaqoo' deelqaafku wuu baxayaa sida bogga soo socda ku cad:

| | |
|---|---|
| 1 | Yaa seef la boodoo |
| 2 | Bayr lahaa colaadaha? |
| 3 | Nugul yaa u baaqoo ** |
| 4 | Boholaha xargagan tubay? |
| 5 | Yaa seef la boodoo |
| 6 | Bayr lahaa colaadaha? |
| 7 | Nugul yaa u-baaqoo *** |
| 8 | Boholaha xargagan tubay? |

## Ereyada ay tahay in la kala qoro

Waxa jira ereyo ay tahay in la kala qoro, hayeeshee loo haysto inay yihiin isku erey qudha, kuwaas oo iyana keena deelqaaf. Tusaale ahaan, bal u fiirso dhawrka tuduc ee soo socda:

| | |
|---|---|
| 1 | Xaq dabool la jaaloo |
| 2 | Samayihii la diidiyo |
| 3 | Madharaari duubtoo |
| 4 | Oo boqor diqyaanuus |
| 5 | Sandareerada u qabo * ← |
| 6 | Rabbow waxa I daashadey |
| 7 | Golayaal distoorkii |
| 8 | Xeerkiyo dadnimadii |

(Xasan-Ganey)

Tuduca **5aad** ereyga '**Sandareero**' waxa loo haystaa inuu erey qudha yahay. Sidaasi kolkii LaaxinJire  lagu bilkeediyey waxa muuqata inuu deelqaaf ku jiro. Kolkase ereygaa la kala qoro ama xariir loo dhexaysiiyo deelqaafki meeshaba wuu kabaxa-yaa sida tuducyada hoos ku qoran ka muuqda:

| | |
|---|---|
| 1 | Xaq dabool la jaaloo |
| 2 | Samayihii la diidiyo |
| 3 | Madharaari duubtoo |
| 4 | Oo boqor diqyaanuus |
| 5 | San-dareerada u qabo * |
| 6 | Rabbow waxa I daashadey |
| 7 | Golayaal distoorkii |
| 8 | Xeerkiyo dadnimadii |

| | |
|---|---|
| 1 | Xaq dabool la jaaloo |
| 2 | Samayihii la diidiyo |
| 3 | Madharaari duubtoo |
| 4 | Oo boqor diqyaanuus |
| 5 | San dareerada u qabo * |
| 6 | Rabbow waxa I daashadey |
| 7 | Golayaal distoorkii |
| 8 | Xeerkiyo dadnimadii |

Waxa kale oo ereyada sidaa u dhaqma ka mid ah ereyga 'Goldaloolo', oo kolka laysku dhejiyo deelqaaf muujiya:

| | |
|---|---|
| 1 | Taladaada debecdiyo |
| 2 | Xilka kaa dalooshamay |
| 3 | Goldalooladaadii * |
| 4 | Hurintii dadaashiyo |

Markase la kala durkiyo ama xariir loo dhexaysiiyo dellqaafku meeshaba wuu ka baxayaasida hoos ka muuqata:

| | |
|---|---|
| 1 | Taladaada debecdiyo |
| 2 | Xilka kaa dalooshamay |
| 3 | Gol-dalooladaadii ** |
| 4 | Hurintii dadaashiyo |

| | |
|---|---|
| 1 | Taladaada debecdiyo |
| 2 | Xilka kaa dalooshamay |
| 3 | Gol dalooladaadii ** |
| 4 | Hurintii dadaashiyo |

# Gabagabo

Qoraalkan kooban, waxan ku xusay shirkii uu sooqalqaaliyey Machadka Afafka Jabbuuti 2012kii kaasi oo socday ammin dhan afar maalmood. Waxaanan wax ka tilmaamay qodobbadii shirkaasi lagu falanqeeyey qaar ka mid ah. Aniga shirka guud ahaan ku tilmaamay inuu ahaa mid ku saabsanaa tallaabo loo baahnaa oo loogu gogol-xaadhayey sidii uu af Soomaaligu u noqon lahaa mid si loo wada qoro. Waxa kale oo aan wax ka sheegay qormaha LaaxinJire iyo hawlaha uu soo kordhiyey. Hawlahaasi oo uu ka mid yahay deelqaafka maansada gala kolka la isku dhejiyo ereyada kala ah: uhiili, ubaaq, utag, madaadshe, madaale, iwm. Kuwaasi oo ay tahay in loo qoro sidan: u hiili, u baaq, u tag, ma daadshe, ma daale, iwm., kolka ay maansada ku jiraan. Taasi oo dhalinaysa in dib loogu noqdo qodobkii ahaa in laysku dhegiyo ereyada lamman. Shirrabaaddii LaaxinJire waxay tilmaamaysaa in haddii ereya jaadkaasa la kala jaro ama xariir loo dhexeysiiyo inaanu deelqaaf maansada geleynin.

## Raadraac

Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo'. *Magac bilaash uma baxo:ujeeddooyinka magacyada iyo naanaysaha Soomaaliyeed, Hal-aqoon publishers*, Calgary, 2008.

--------, Gorfaynta buugga la yidhaa: *Literature of Somali Onomastics and proverbs*, hal-aqoon, warsidaha dhaqanka iyo suugaanta Soomaaliyeed, tirsigii VI aad,VII, iyo VIII aad, 2006-2009

------, *Magac bilaash uma bax:ujeeddooyinka magacyada iyo naanaysaha Soomaaliyeed,* Hal-aqoon publishers, daabacaaddii 2aad, Calgary, 2008.

---------. *Hodannimada afka miyi iyo hagardaamada ay magaalo ku hayso*, Buraanbur Conference, hosted by The center for bridging communities, San Diego, 2007.

---------. *Hal-bixinta ereyada kumbuyuutarka,* Hal-aqoon publishers, Calgary, 2007.

---------, *U hiisha afkeenna*. Hal-aqoon, tirsigii VI aad, VII&VIII aad ee 2006-2009.

Xasilloonidarrada af Soomaaliga

Qodobadii lagu heshiiyey shirkii Jabbuuti, 2012ka ee Machadka afafka Jabbuuti.

LaaxinJire , www.halgeri.com

# QORMAHA ASOORE

The Text Analyser

# IV. QORMAHA ASOORE


The Text Analyser

Qormahii aannu bilawgii samaynay halkii kaga ma aanaan hadhin, hayeeshe, waxaannu nabdiga ku haynay ama noo qorshaysnaa inaan ku soo laabanno kolka aannu LaaxinJire meel isla dhigno. Sidaasi darteed buu hadda ugu jiraa oo uu ugu lamman yahay LaaxinJire .

Sida sawirkan hoos ka muuqata, bogga hore ee *LaaxinJire* waxaa ku qoran badhanka *Asoore/Text Analyzer*. Riix waxaana kuu soo bixidoona bogga *Asoore*. Labada badhan ee qalwada ku dhex jira, ka hore ee ay ku qoran tahay *Xulo/Choose file* oo riix, waxaana kuu soo bixi halka ay maansada aad bilkeedineysaa kuugu kaydsan tahay sida sawirka **Az.2** ka muuqata.





Az.1




Az.2

Tusaale ahaan, haddii aad rabto inaad bilkeediso maansada '*Abaar'*, riix iyada qudheeda, kaddibna riix badhanka hoose ee ay ku dul qoran tahay *'Gudbi/Submit.* Waxaa kuu soo bixi dhurtii aad sugeysey sida ka muuqata sawirka 3aad.





Az.3

Haddii aad u fiirsato dhanka midig, waxa kla hooseeya labada qalwo oo leh midab buluugga leh, ka sare wuxu kuu

sheegayaa ama tilmaamayaa magaca maansada aad shirrabtay oo ah '*Abaar*'. Tirada *ereyada guud* ee maansada ku jira oo ah 33 erey iyo *kuwa gaar* oo ah 32. Waxa kale oo uu kuu sheegayaa ereyga loogu *adeegsiga badan* yahay oo ah '*baa*', ereyga ugu dheer iyo ka ugu gaaban ee maansada ku jira iqb.

Shaxanka dhexe wuxuu kuu tilmaamayaa kalgalka (erey kasta inta jeer ee la adeegsaday) iyo mid kasta inta xaraf ee uu ka kooban yahay.

Shaxanka midigta u xiga isagu wuxu tilmaamayaa xaraf maansada lagu adeegsaday iyo mid kasta inta jeer ee la adeegsaday. Kolkastana xarafka 'a' baa kolkasta ugu adeegsi badan.




Az.4

Si aad u hubiso in ereyga u dheer, u gaaban ama ugu adeegsiga badan uu sax yahay iyo inkale, ereyga ku qor qalwada yar ee midabka huurda ah leh sida ka muuqata sawirka 4aad. Kolkii aan ku qoray ereyga '*baa*' waxa soo baxay inuu ereygaasu yahay ka ugu adeegsiga badan oo la

adeegsaday la jeer oo qudha, kana mid yahay kuwa ugu gaaban oo uu ka kooban yahay 2 dhawaaq oo keliya.

# Tuse /Index

# Tuse


A.A.Farah 'Guri Barwaaqo' ........................................ 5

About us........................... 11

Abwaan Xasan Xaaji Cabdillaahi 'Ganey'... 19

Adeegyo ........................... 11

af Soomaaliga ............ 29, 43

Alliteration error............. 11

Analyze ........................... 11

Analyzer........................... 11

Asoor ............................... 11

Asoore.....................10, 11, 45

ASOORE............2, 3, 44, 45

*Batar* ................................ 22

*Bilkeedi maansada* ............ 24

Cabdiraxmaan C. Faarax 'Guri Barwaaqo' ............ 3

checker............................. 15

Dabataxan ........................ 19

Deelqaaf...................... 11, 34

Dhur ................................. 11

Frequencies ...................... 11

Frequency......................... 11

*Fur* .................................... 24

Gabagabo.......................... 42

*galka* (the folder)............. 22

gammuunka .................... 22

*gosha* ( the directory) ..... 22

**Hal-aqoon Publishers**...... 4

Hargeysa ........................ 4, 5

*Hayaan Institute*................ 20

Index ................................ 49

Jabbuuti .......... 28, 36, 42, 43

*Jiifto* ............................ 22, 25

Kalgal............................... 11

Kalgallo ............................ 11
Kolombas (Colombus) ... 10
Kood-buur ......................... 5
Laaxin ....................11, 32, 33
Laaxinjire.................... 18, 20
LaaxinJire .10, 16, 17, 18, 19, 20, 21, 22, 23, 24, 25, 26, 27, 28, 32, 36, 39, 42, 43, 45, 52
LAAXINJIRE..................2, 3, 15
Machadka afafka Jabbuuti ................................ 28, 43
Machadka Hayaan ......... 2, 20
*Masafo* .............................. 22
Maxamed Xaashi Dhamac 'Gaarriye' ............... 10, 34
Miisaan....................... 11, 17
Miisaanka Maansada...... 18
Miisaankii Maansada .... 27
Nagu saabsan .................. 11
Nala soo xidhiidh............ 11
Number ........................... 11
Ohio.................................. 10
*Open* ................................. 24
**plain text** .......................... 20
Qaafiyad ........................... 11
qalwada .......... 21, 22, 24, 26
Raacii 1aad (*1st version*) ... 10
Raacii 2aad (*2nd Version*) . 10
Raadraac ........................... 43
Result ............................... 11
**RTF**.................................. 20
Scansion..................... 11, 15
Scansion error .................. 11
*ScansionCheck* ................... 21
Serveces ........................... 11
Soomaalilaan.................... 28
Soomaaliya ....................... 28

*The Theory of Numbers* ..... 15

Tirsi .................................. 11

tuduc.......................... 17, 19

Tuduc............................... 11

Tuducyo .......................... 11

Tuse................................... 49

Verse ................................ 11

Verses............................... 11

window............................ 21

www.halgeri.com...... 18, 43

xarafraac .......................... 11

Xuseen-Mataan................ 15